



# Waaxda Booliska Degmada San Diego

## Waafaqsan Sharcigii Aqalka Sare ee 54: Xeerka Qiyamka California(California Values Act)

Waaxda Booliska ee Is maamulka San diego waxay soo dhaweynaysaa kala duwanaanshaha balaaran ee bulshooyinka aan u shaqayno. Wuxuu muhiimadda siinaynaa xiriirka aan la leenahay bulshada waxaana rabnaa in dhammaan dadka deegaanku in ay ammaan dareemaan xiliga ay faldanbiyeed soo sheegayaan.

### Hay'adda Adeegyada Dhaqangalinta Sharciga

- Ku xigeenada boolisku ma baaraan mana dhaqangaliyaan sharciga socdaalka ku saabsan.
- Ku xigeenada boolisku ma weydiinayaan shakhsiyaadka xaaladahooda soogalootinimada.
- Waaxda Booliska gobolku ma qabqabanayaan dadka ayaka oo ku slaaynaya waaranada xarigga ah ee federaalka.
- Waaxda Booliska gobolku ma qabqabanayaan dadka ayaka oo ku slaaynaya waaranada xarigga ah ee federaalka.
- In ilaha waaxda loo isticmaalo ujeedooyin la xiriira dhaqangalinta sharciyada sodaalka waa la mamnuucay.
- Ku xigeenada booliska gobolku uma isticmaalaan saraakiisha socdaalka adeegyo tarjumaan.
- Waaxda booliska gobolku lama wadaagaan macluumaadka qofka tilmaamaya hay'adaha dhaqangalinta shuruucda socdaalka.

### Ka qaybgalka Koox Howleedka

- Shaqaalaha booliska gobolka ee loo xilsaaray kooxo howleedyada gobolku ma dhaqan galiyaan sharciga socdaalka.
- Shaqaalaha booliska gobolka ee la howl galiyay kuwaas oo ka qaybqaadanaya howl kooxeedyada gobolku waxay dhaqangaliyaan shuruucda gobolka iyo kuwa federaalka ee la xiriira maandooriyaha, faldanbiyedyada wadanka dhexdiisa iskaga gudbaya, ka ganacsiga dadka, hubka, argagaxisada iyo ficiilada kale ee xadgudubyada danbiga ah.

### Akhriyeyaasha Shatiyada Taarikada

- Waaxda Booliska gobolku ma ogolaanayo in xogta akhrinta shatiga taarikada lala wadaago Waaxda Ammaanka Gudaha ama wakaaladaha Socdaalka iyo Dhaqangalinta Xaduudaha (ICE).

### Xabsiyada

- Waaxda Booliska gobolku kuma wareejinayso shakhsii hay'adaha socdaalka in uu waaran maxkamdeed u fasaxo maahane ama lagu saleeyo xukun keeni arintaas marka la eego sharciga gobolka.
- Waaxda Booliska gobolku ma bixin doonto macluumaad khuseeya taariikhda sii daynta qofka kamana jawaabayso codsi ogaysiis ku saabsan taariikhda sii daynta ama macluumaad kale in macluumaadkaas uu yahay mid bulshadu ka war hayso maahane ama u keeni kara xukun sida kor lagu sheegay.
- Wixii ka baxsan hay'adaha dhaqangalinta sharciga, oo ay kujiraan wakaalada Socdaalka iyo Dhaqab galinta Xaduudaha (ICE), ma soo gali karaan goobaha ama xabsiyada booliska gobolka. Waxaa laga rabaa in ay lagu hubiyo barta ugu weyn ee laga soo galo goobta ayna raacaan tilmaamaha bookhadaha ee rasmiga ah.
- Waaxda Booliska gobolku ma bixiso goob xaafiis ah oo loogu tala galay hay'adaha socdaalka.
- Foomka aqbalaadda (ku diyaarsan luuqado badan) ayaa la iska rabaa in la buuxiyo loona diro qofka xiran ee kujira xabsiga ismaamulka wixii ku saabsan dhammaan wareysiyada ay qaadayaan wakaaladaha ICE. Foomkaan wuxuu qofka ku wargalinayaa in ICE codsatay in ay wareystaan. Qofka xiran wuxuu khiyaar u leeyahay in la wareysto asaga oo uu la joogo garyqaan, ama uusan la joogin garyqaan uma uu iska diido waraysiga. Adeegyada tarjumaanka waa la bixinayaan, mana jiro cadaadis la saarayo qofka xiran taasoo khusaysa khiyaaradiisa.

### Daahfurnaan

- Warbixinada, bandhigiyadii hore, iyo xogta la xiriirta RUNTA, AAMINAADDA(TRUST, TRUTH), iyo/ama Xeerka Qiyamka ayaa laga heli karaa [www.sdsheriff.gov](http://www.sdsheriff.gov) qaybta Resources- Open Data.